

Heshiiska Waalidka/Masuulka ee Adeegsiga khadka Interneetka (Hot Spot) ee mashruuca 1Million Project oo ay bixiso Sprint

(Fadlan buuxi hal foom arday kasta oo kaqaybgalaaya)



Magaca Waalidka/Masuulka _____
(Koobaad) (Sadexaad)

Magaca Ardayga _____
(Koobaad) (Sadexaad)

Taariikhda Dhalashada Ardayga _____ Fasalka Ardayga _____ Aqoonsiga Ardayga _____

Waxaan ogolaansho siinayaa _____ inuu kaqaybgalo mashruuca 1Million Project oo ay bixiso Sprint (mashruuca). Mashruucu wuxuu baxshaa adeegyada interneetka (hot spot) oo bilaash ah, taasoo adeegyada interneetka siisa ardayda aan haysan adeegga interneetka oo gurigooda kuxiran.

Waxaan xaqiijinayaa in ardaygaygu uusan haysan khadka interneetka oo guriga kuxiran, iyo in Mashruucu uu noqon doono isha kaliya ee ardaygaygu interneet guriga ugu heli karo. Inaadan haysan interneetka guriga ayaa kadhigan: a.) gurigu malaha khadka interneetka, b.) arday badan oo guriga kuwada nool oo kaliya haysta hal kumbuyuutar, ama c.) interneetka guriga kuxiran oo ah kan wicitaanka.

Waan fahmayaa in ardaygaygu uu heli doono aalad leh khadka interneetka si uu ugu adeegsato ujeedooyinka dhanka waxbarashada. Waxaan fahmayaa in Sprint, Mashruuca iyo Denver Public Schools ay macluamad ka aruurin karaan ardaygayga iyo/ama ay lasoonayaan adeegsiga ardaygaga ee aalad kasta oo mashruucu siiyay. Waan fahmayaa in adeegsiga Sprint ay adeegsanayso macluumaadka shaqsiga ah e ardaygayga lagu jaan-goynaayo Xeerka Arimaha Shaqsiga ee Sprint (oo laga heli karo barta www.sprint.com/privacy) iyo in adeegsiga aalada kasta oo cunugaygu isticmaalo waa inay waafaqsanaataa Xeerka Adeegsiga La Ogolyahay ee Sprint (www.sprint.com/en/legal/acceptable-use-policy). Waxaan fahmayaa in ay qasab kutahay ardaygayga inuu kudhaqmo *Heshiiska Aaladaha MyTech iyo Adeegyada Ururka ee Dugsiga*. Waxaan kaloo fahmayaa in aaladaha lasiiyay Ardaygayga laga qaadan karo, adeegyada interneetkana laga jaran karo, ama Mashruuca oo dhanba lajoojin karo xli kasta ayadoo labxshay ama aan labixin wax ogaysiis ah aana midkoodka Sprint walaa Denver Public Schools wax masuuliyad ah kasaarnayn sii wadida bixinta aaladaha, adeegga interneetka ama faaiidooyin kale oo mashruucu baxsho si joogto ahna loosiyo ardayga.

Waxaan kacafinayaa sheegasho kasta oo kadhan ah Sprint; Sprint Prepaid; the Sprint Foundation; Denver Public Schools; ama xubnaha ladoortay ee gudigeeda, shaqaalaha, wakiilada iyo qandaraaslayaasha (si guud, Adeeg Bixiyaasha Mashruuca) ee laxariira mashruuca 1Million Project oo ay bixiso Sprint. Cafiskayga waxaa kujira, laakiin kuma koobna, sheegashooyin kasta oo laxariira aruurinta macluumaadka ay aruuriyaan Adeeg Bixiyaasha Mashruuca iyo talaabooyinka lagula soconaaya adeegsiga aaladaha; Adeegsiga Adeeg bixiyaasha Mashruucu adeegsadaan macluumaadka shaqsiga ahee ardaygayga oo lagusoo aruurshay Mashruuca, hadii lagu kaydiyo iyo hadii kalaba aaladaha Mashruucu baxshay; helitaanka uu macluumaadka helo qof sadexaad oon fasax haysan, kala wareejinta xatooyada lagula kaco macluumaadka ardaygayga, dukumiintiyada ama barnaamijyada lagu kaydiyo aaladaha uu baxsho Mashruucu; awooda ama awood la'aanta ardaygyga ee helitaanka xawaarayaasha interneetka oo gaar ah (tusaale, 4G).

Mashruuca 1Million Project waxay haystaan fasaxayga ku aadan inay isticmaalaan sawirka cunugaga si dadku wada arkaan si ay ugu xayiisiiyaan Mashruuca. Waxaan fahmayaa in sawirada loo adeegsan karo daabacaadaha qoran, daabacaadaha oonleena ah, bandhigyada, webseetyada, iyo baraha bulshada. Waxaan sidoo kale fahmayaa inaysan jirin maslaxad gaar ah, lacag ama magdhaw kale oo laygu siinaayo sabab laxariirta isticmaalka noocaas ah.

Waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka kuqoran foomkaan uu yahay mid sax ah, aana awood uleeyahay inaan ogolaanshaan baxsho.

Saxiixa Waalidka/Masuulka



QODABKA DHEERIGA AH EE A – XEERKA MAARAYNTA AALADA

Xeerkaan Maaraynta Aalada wuxuu qabanayaa aaladaha Sprint iyo adeegyada ururka ee ay Ardayda siiso DPS. Xeerarka iyo shuruuda kujira **Xeerka Maaraynta Aalada** waxaa loogu talagalay in lagu kordhiyo - mana ahan in lagu badalo -- xeerarka iyo shuruudaha kujira **Heshiiska Ardayda iyo Waalidka/masuulka ee Heshiiska Adeegsiga Aaladaha MyTech iyo Adeegyada Ururka** (“Heshiiska”). Markay jirto xiisad kadhax oogan **Xeerka Maaraynta Aalada iyo Heshiiska, Xeerka Maaraynta Aalada** ayaa awooda sare leh.

Waalidiinta iyo Ardaygu waxay aqbalyaan inay raacaan xeerarka iyo shuruudaha soosocda:

A. Adeegyadaada Wireless-ka waxaa kusiinaysa Sprint Forward (www.prepaid.sprint.com). Xeerarka hoose ayaa sal unoqonaaya Adeegsigaaga adeegga Sprint Forward. Waxaad ciwaankaaga u iibsana kartaa Refill adoo iibsanaaya kaarka Sprint Forward Refill, adoo ku iibsanaaya oonleen ahaan kaarkaaga daynta ama koontada baanka, ama adoo booqanaaya dukaanka Sprint. Markaad lacagta kushubato ciwaankaaga, waxaad iibsana kartaa baakada data-da si oonleen ah adoo galaaya barta sprint.com/prepaid kadibna dhagsiinaaya qaybta Plans (Qorshayaasha/ kadibna sii gujinaaya Additional Services (Adeegyada Dheeriga ah). Fadlan ogoow inaan dhamaan qorshayaasha/adeegyada oo dhan aysan ufunayn Ardayda kujira Mashruuca 1Million Project. Midkoodna qarashaadka adeegga ama baaqiyada ciwaanka kuugu haray laguumasoo celin karo ama qiimahooda laguuma magaayo hadii adeegga lajoojiyo ama wax laga badalo. Canshuuraha iibka iyo qarashaadka gobalka, deegaanka ayaa laga jaran karaa markaad lacag kushubanayo koontooyinka. Sprint waxba ma dayminayo ama lacag kuma celinayo koontadaada sabab laxariirta isbadalo aad kusamaysay Adeegyadaada.

B. Adeega waa lajoojin karaa ama lahakina karaa markii ladoono ama bilaa sabab. Tusaale, Sprint waxay hakin kartaa ama joojin kartaa Adeeg kasta sababaha soosocda awgood: (a) inaad kufashilanto inaad haysato ama ilaalsato baaqi kugu filan oo koontada kuugu jira si lagaaga jaro qarashaadka lagugu yeesho; (b) dhibaataaynta/uhanjebida/caayida/kuxadgudubka shaqaalaheena ama wakiilada; (c) bixinta macluumaad been ah ama khaldan; (d) faragalinta shaqooyinka Sprint; (e) inaad u isticmaasho/laa shakiyo inaad Adeegyada u adeegsanayo qaab aan la ogolayn ama kasoo horjeeda Heshiiska iyo Xeerka Quseeya; (f) Burinta, kufashilmida inaad raacdo, ama kuxadgudubka Heshiiska iyo Xeerarka Laxariira; (g) inaad aalada wax kabadasho qaab dhismeedkii ay usamaysay shirkadii soosaartay (tusaale, inaad sifayso systemka aalada); ama (h) hadii Sprint ay aaminsan tahay in talaabada joojintu difaacayso masaalixdeena, masaalixda cid kamid ah macaamiisha, ama ururada Sprint.

C. Ha u adeegsan Adeegyada Sprint inaad waxyeelo ugaysato ama aad si xun usamayso macaamiisha kale ee Sprint ama sharafta, ururada, hantida, ama adeegyada Sprint. Marnaba dib ugma iibin kartid Adeegyada qolo kale. Sprint ayaa qaadi karta talaabo kasta si ay: (1) udiiaacdo ururadeena, xaquuqdeena iyo masaalixdeena, ama xaquuqda dadka kale; ama (2) inay hormariso ama kor uqaado isticmaalka guud ee ururada iyo Adeegyada.

D. Xeerka Arimaha Shaqsiga ee Sprint waxaad kahelaysaa sprint.com/privacy. Xeerka Arimaha Shaqsiga wuxuu maamulaa adeegsiga iyo faafinta ay Sprint kusamayso macluumaadkaaga shaqsiga ah, wuxuuna sharxayaa dookhyadaada dhanka macluumaadka. Sprint waxay cusboonaysiin kartaa Xeerka Arimaha Shaqsiga xiliba xiliga kadanbeeya waxayna kugu dhiirgalinaysaa inaad si joogto ah u akhrido. Markaad adeegsato application-nada qoloda sadexaad, adeegsigaagu wuxuu hoos tagayaa xeerarka iyo shuruudaha qolada sadexaad iyo xeerarkooda, ayna kujiraan xeerkeeda arimaha Shaqsiga. application-nada qolada sadexaad ayaa gali kara, qaadan kara, adeegsan kara, ama faafin kara macluumaadkaaga shaqsiga ah ama naga dooni kara inaan faafino macluumaadkaaga shaqsiga—ayna kujirana macluumaadka goobta (markay macquul tahay)—oo lasiinaayo qofka applicationka bixinaaya ama qolo kale oo sadexaad. Haddaad adeegsanayo application-nada qolo sadexaad, waxaad ogolaanaysaa una Fasaxaysaa in Sprint ay siiso macluumaadka laxariira adeegsigaaga Adeegyada ama application-nada.

E. Ururada Sprint waxay guud ahaan yaqanaan goobta aaladaada markaad la aado meel kabaxsan guriga iyo/ama aad daarto. Ayadoo adeesanaysa farsamooyi kaladuwan si ay ulasocoto goobta aaladaada, Sprint waxay bixin kartaa adeegyada xaalada degdeg ah ee 9-1-1 oo casri ah iyo adeeyo ikhtiyaari ah oo goobta sheegaaya oo aan nagu bixino ama qolo sadexaad bixiso. Aaga uu ururku daboolo ama arimaha dhanka bii'ada (sida qaababka, dhismayaasha, cimilada, juquraafiyada, togaga, iyo cilmiga qaab dhismeedka bii'ada) ayaa si wayn usamayn kara awooda helitaanka macluumaadka goobta laadaada iyo adeegsiga aaladaha sheega goobta.

F. Waxaad awoodi doontaa inaad awoodo internetka, inaad fariimo qorto, sawiro qaado, muuqaalo duubto, gaymam ciyaarto, wax kusawirto, muusig shidato, iimeel dirto, application-no adeegsato, cod duubto, iyo adeegyada kale (“Qaybaha Macluumaadka”) aadna udirto Qaybaha Macluumaadka meel kale adoo adeegsanaaya Adeegyada Sprint iyo aaladaada. Qaybaha Macluumaadka waxaad kaheli kartaa anaga ama dadka adeegyadeena baxsha, halka aad Qaybaha kale ee Macluumaadka kaheli karto qolyaha kale (tusaale, webseeyada ururada kale, gaymamka, codadka muusiga, application-nada, iwm.) Sprint marnaba ma damaanad qaadayso Qaybaha Macluumaadka ee aad kagasho aaladaada. Qaybaha Macluumaadka ayaa noqon kara: (1) kuwo aan kuhaboonayn caruurta/ilmaha da'yarta ah; (2) mid aan laysku halayn karin ama khaldan; ama (3) mid aflagaado ah, fisqi ah, ama mid ladiidi karo ah Adigoo kaliya ayaa masuul ka ah qiimaynta Qaybaha Macluumaadka aad gasho ama u galo qofkasta oo Adeegyadaada kamid ah. Qaybaha Macluumaadka ee kayimaada qolada sadexaad ayaa sidoo kale waxyeelayn kara aaladaada ama softwarekeeda. Sprint masuul kama ahn wax Qaybo Macluumaadka Kamid ah. Sprint masuul kama ahan wixii waxyeelo ah oo kadhaxa Qayb Macluumaad ood kugashay Adeegyadaada, taasoo aad kushubtay aaladaada, ama aad codsatay in wakiiladeena ay galaan ama kushubaan aaladaada. Sprint waxay galin kartaa xanibaado galitaanka Qaybo Macluumaad oo gaar ah (sida webseeyada qaar, application-o, iwm.); kusoo rogi kartaa qarashaad gaar ah; waxay yarayn kartaa dhamaan ama cadadka macluumaadka aad gudbin karto; ama waxay hadii kale yaraynaysaa ama joojin kartaa Adeegyada. Sprint waxay kusiinaysaa kaydka Qaybaha Macluumaadka ood soo ibsatay, kadibna waxay tiri kartaa Qaybaha Macluumaadka ayadoon ku ogaysiin ama xanibaado ayay saaraysaa/koobid adeegsiga meelaha wax lagu kaydsado. Qaybaha Macluumaadka ee lagu xareeyo aalada, lagu diro khadadka ay maamusho Sprint, ama ay kaydiso Sprint Forward waa latiri karaa, waxbaa laga badali karaa, ama waxyeelo ayaa gaari kara. Waxaa macquul ah inaad awoodin inaad samayso ama hesho wicitaano cod ah intaad isticmaalayso Adeegyada Data-da. Qaybaha Macluumaadka ay bixiyaadeed bixiyaasha Sprint ama qolyaha sadexaad waa lajoojin karaa ama labaabi'in karaa xili kasta ayadoon lagu ogaysiin, waxaana macquul ah inaad helin lacag soocelis ah oo laxariirta wax kamid ah Qaybaha Macluumaadka internetka oodan adeegsan. Waxaad ogolaanaysaa in Sprint ay adeegsan karto qaayay, farsamooyin, ama hanaano ay kusifaynayso ama kuxanibayso fariimaha, ay kusifaynayso "tuugaa", ama uga hortagayso "jabsiga systemka," "fayrisiyada," ama dhibaatooyinka kale ee imaan kara ayadoon laga eegin wax dookh ah ood horay nooga codsatay.

G. Ma adeegsan Kartida Adeegyada Internetka ee Sprint: (1) adoo adeegsanaaya aaladaha seerfarka ama application-nada kumbuyuutarka kujira, ama systemyada kale ee kala gudbiya qaybaha joogtada ah, ee culus khadka ama macluumaadka; (2) in ay badal kuugu noqoto ama kayd kuugu noqoto



laymanka gaarka ah ama xariirada fareemka kutiirsan; ama (3) sabab laxariir isticmaal kale oon loo qasdin maadaama Sprint ay u aqoonsanayso dayacaad kas ah. Sprint waxay xaq uleedahay inay yarayso, hakiso, ama xanibto adeegsi kasta oo isticmaalka internetka oo culus, oona joogto ah kaasoo saamayn xun kureebaaya shaqada khadkeena ama caqabad ku ah galitaanka khadadkeena.

H. Markaad wacayso 9-1-1 ama adeegyada kale ee xaaladaha degdega ah, waa inaad markasta diyaar unoqotaa inaad sheegto macluumaadka goobta aad joogto. Si kaduwan taleefanada caadiga ah ee fiilooyinka leh, taasoo kuxiran arimo dhawr ah (tusaale, in aaladaadu tahay mid leh adeegga GPS, meesha aad joogto, in adeeg bixiyaasha xaalada degdega ah ee deegaankaagu ay haystaan qalab casri ah, iwm.), shaqaalaha 9-1-1 ma aqoon karaan nambarka taleefankaaga, goobta aad joogto, ama goobta aaladaada. Markay jiraan xaalado gaar ah, wicitaanka degdega ah wuxuu udhici karaa laynka ciidanka roondada ee gobalka ama goob kale oo adeeg bixiyaasha xaaladaha degdega ah ay dajiyeen. Adeegga casriga ah ee 9-1-1 ("E9-1-1")—markay fasaxaan saraakiisha xaaladaha degdega ah ee deegaanku—wuxuu adeegsadaa farsamada casriga ah ee GPS si uu usheego goobta qofku joogo. Hase yeeshee, xataa marka uu furan yahay, adeegga E9-1-1 markasta mabixinaayo macluumaadka goobta oo sax ah. Hadii aaladaadu kujirto gudaha guriga ama sabab kale awgeed aysan soo qaban karin anteenada satalaytku, goobtaada lama ogaan karo. Aaladaha qaar ayaa leh qayb dhanka badqabka ah taasoo kahortagaysa adeegsiga qaybta qoraalka ee aalada kadib markaad wacdo 9-1-1—waa inaad raacdaa codka tilmaamaha ah markaad lahadlayso adeeg bixiyaasha adeegyada xaalada degdega ah kuwaasoo jawaabaha hadalka codka ah gaarsiinaaya shaashadaha systemyada wicitaanka.

I. ILAA IN SI CAD QORAAL AHAAN LOOGU SHEEGO MAAHEE, MIDKODNA MASHRUUCA 1MILLION PROJECT FOUNDATION WALAA SPRINT MABIXINAAYAAN WAX MATALAAD AH AMA DAMAANAD QAAD AH, SI QORAL AMA HADAL AH, AYNA KUIRAAN (ILAA INTA SHARCIGU OGOLYAHAY) AMAANAD KASTA OO AFKA LAGA YIRI OO LAXARIIRTA KAGANACSIGA, SI KHALDAN U ADEEGSIGA, AMA KUHAABOONAANTA UJEEDO GAAR AH OO LAXARIIRTA ADEEGYADAADA (AYNA KUJIRAAN AALADAADA IYO SOFTWARE-KA AMA APPLICATION-NADA KUJIRA AALADAADA). MIDKODKA MASHRUUCA 1MILLION PROJECT FOUNDATION, WALAA SHIRKADA SPRINT MADAMAANAD QAADAAYO ADEEGYO AAN CILAD LAHAYN AMA AAN CARQALAD GALAYN QOFNANA UMA FASAXAYAAN INUU DAMAANAD SAMEEYO ASAGOO AYAGO WAKIIL KA AH. MASHRUUCA 1MILLION PROJECT FOUNDATION IYO SPRINT, SIDA MACQUULKA AH, AYAA BIXINAAYA SOFTWARE IYO APPLICATION-NO "SIDAY YIHIIN AH" AYAGOON LAGA SAARIN CILADHA, KAHALADAADKA, IYO WAXYELOOYINKA AY QABI KARAAN.

J. Waxaad ogolaanaysaa in aan midkoodna Mashruuca 1Million Project Foundation, walaa Sprint walaa waalid, kaaliye, ama shirkadaha laxariira midkoodna, walaa adeeg bixiyaashooda, shirkadaha lashaqeeya, ama qolyaha ruqsada haysta aysan masuul ka ahayn wax waxyeelo ah, dib udhac ah, carqalad ah ama fashilaad kale oo katimaada shaqada oo ka imaanaaya: (a) wax uu sameeyay ama uusan samayn qofkale; (b) bixinta ama kufashilmida bixinta Adeegyada, ayna kujiraan, laakiin aan kukoobnayn, ciladaha ama dhibaatooyinka kudhaca aalada ama khadka internetka (tusaale, uu hoos udhaco, laxanibo, Adeegyada oo carqalad gasho, iwm.); (c) taraafig ama shilal kale, ama wax shegashooyin ah oo dhanka caafimaadka ah oo loosoo gudbiyo Adeegyada Sprint; (d) Qaybaha Macluumaadka ama warbixinada kale ee aad gasho intaad isticmaalayso Adeegyada Sprint; (e) caqabad ama fashil kuyimaada galitaanka ama iskudayga galitaanka adeegyada xaalada degdega ah adoo adeegsanaaya aalada, ayna kujiraan adeegga 9-1-1, adeegga 9-1-1 ee casriga aha ama qaab kale; (f) adeegyada macluumaadka goobta oo cilad gasho, fashilma, ama khalad noqda; (g) macluumaad ama xariir uu xanibay nidamaka sifaynta tuugadadu; (h) waxyeelo gaarta aaladaada ama kumbuyuutar ama qalab kuxiran aaladaada, ama waxyeelo ama khasaaro kudhaca macluumaad kasta oo kujira aaladaada, kumbuyuutar, qalab, ama kaydka Sprint Forward sabab laxariirta inaad adeegsatay Adeegyada ama kayimaada fayris, cayayaan, ama sawiro, muuqaal, ama cod; (i) waxyaabaha aysan xukumin Sprint, ayna kujiraan qadarta Ilaahay (tusaale, masiibooyinka cimilada kadhaca, dabka, dhulgariirka, duufaanta, iwm.), rabshadaha, mudaaharaadka, dagaalka, argagixisada, ama awaamiirta ama ficilada dawlada. Waa inaad dagsataa hanaano badbaado oo kuhaboon si aad u ilaalsato amaanka aaladaada, kumbuyuutarka, ama qalab iyo kaydka macluumaadka kujira midkasta oo kamid ah.

K. ILAA INTA UU OGOLYAHAY SHARCIGU, MASHRUUCA 1MILLION PROJECT FOUNDATION IYO MAKTABADA SPRINT EE WAXYELOOYINKA MAALIYADEED EE LOOGU TALAGALAY WIXII SHEEGASHOYIN AH OO KAQABTO ADEEGYADENA WAXAA LAGUSOO KOOBAYAA WAXAAN KABADNAYN CADADKA SAXDA AH EE QARASHAADKA ADEEGGA, HADAY JIRAAN, OO KUJAANGO'AN WAQTIGA AY CILADU DHACDAY. SINABA MARN MASUUL KAMA AHAN SHIRKADA SPRINT AMA MASHRUUCA 1MILLION PROJECT FOUNDATION WAX WAXYELO AH OO KAMA' AH, CAWAAQIB XUMO KUYIMAADA, CIQAAB AH, BADAN, AMA QAAS AH NOOCU RABABA HANOQDEE WAXKASTA OO KAYIMAADA AMA LAXARIIRA BIXINTA AMA KUFASHILMIDA BIXINTA ADEEGYADA LAXARIIRA AALADA, AYNA KUJIRAAN, LAAKIIN AAN KUKOORNAYN, LUMINTA FAAIIDADA, LUMINTA GANACSIGA, AMA QARASHKA SOO MAGIDA AALADHA AMA ADEEGYADA.

L. Hadaad doorato inaad Adeegyo kudarsato kaarka Sprint Forward Refill: Lacag kushubida koontadaada waxaad ayadoo faahfaahsan kahelaysaa sprint.com/prepaid.

(1) Sidee ayay Sprint Qarash Usartaa Adeegsiga Internetka: Ayadoo kuxiran Adeeggaaga, waxaa lagaa qaadi karaa qarashka internetka aad isticmaasho. Ilaa in Sprint ay qaab kale kuyisheego maahee, adeegsiga internetka waxaa lagu cabiraa bytes, kiloo-bytes, megabytes, iyo gigabytes—lagumana cabiro daqiiqado/waqtii. 1024 bytes waxay udhigan taa 1 kilobyte ("KB"), 1024 KB waxay udhigan taa 1 megabyte, halka 1024 megabytes ay udhiganto 1 gigabyte. Bytes waxaa lagu cabiraa ilaa tirada ugu dhaw ee KB, marka waxaa lagu xisaabinayaa ugu yaraan 1 KB markasta ood khadka internetka adeegsato ("adeegsiga khadka"). Iskurarista xisaabta ayaa lasameeyaa markasta ood dhamayso isticmaalka internetka iyo mararka qaar adoo wali isticmaalaaya khadka. Ayadoo kuxiran Adeeggaaga khadka, adeegsiga waxaa lagaaga qaadi karaa lacag qiimo dhimis leh ama qiimo ugo'an halkii KB ba, waxaadna waajihi kartaa xadidaado lasaaro cadadka khadka aad isticmaalayso. Hadii lagu xukumo qiimo gaar ah halkii KB ba, wixii sentiyo jajah ah waxaa lagu darayaa santiga xigga. Waxaa lagaa qaadayaa dhamaan qarashka khadka lagu adeegsado gurigaaga, ayna kujiraan adeegsiyada khadka ee aadan adigu adeegsan iyo waxyaabaha ad dirto ee aan dhamaystirmin. Ilaa iyo inta aaladaadu kuxariirsan tahay khadadka internetka ee Sprint, waxaa kufuuli kara qarashaadka internetka. Tusaalayaasha khadka lacagtiisa lagaa qaadaayo waxaa kamid ah xajmiga fayka Qaybta Macluumaadka ee aad codsato (gaymka, heesta, iwm.); sawirada webseetka (astaamaha, sawirada, boorarka, xayiiisinta, iwm.); khadka dheriga ah ee loo adeegsado galitaanka, rarista, iyo soosarista faylka kujira khadkeena; khadka kubaxa waxyaabaha aad soo dagsanayso ee qayb ahaan soodaga ama ciladu gashay; khadka waxyaabaha aad markale dirto; iyo khadka laxariira iskudayada fashilma ee aad kugalayso webseetyada ama adeegsiga application-nada. arashaadkaan dhanka khadka waxay dheeraad kuyihiin qarashaad kasta oo kubaxa Qaybaha Khadka internetka kubaxa laftooda (gaynka, heesta, iwm.) Khadka aad adeegsato ee lacagtiisa lagaa qaado aad ayay ukaladuwanaan doontaa, xataa inta udhaxaysa talaabooyinka



DENVER
PUBLIC
SCHOOLS

MyTech

iskumidka ah ama isticmaalada khadka. Qiyaasaadka adeegsiga khadka—tusaale ahaan, xajmiga faylalka aad soo daganayso—maaha qiyaasaad sax ah oo muujin kara isticmaalka saxda ah.

(2) Abuurista Baaqiga Koontada. Maclumaad kusaabsan sida aad u aburi karto aadna ku ilaalin karto baaqiga koontada waxaad kahelaysaa barta sprint.com/prepaid ama inaad gasho Daryeelka Macaamiisha Sprinta Forward. Qaababka kaydka ee aad heli karto waxay kutiirsanaan karaan xaaladaha Adeegyadaada. Qarash ayaa lagaaga jaran karaa qaababka kaydka qaarkood. Qorshayaasha adeegyada qaar ayaa kusiin kara qaabka kaydka baaqiga koontada oo otomaatig ah, tusaale ahaan, biil dirista oo ootomaatig ah loona diraayo kaarka daynta ama baanka ama gaarka baanka oo ootomaatig ah laganasoo diraayo koonto uqalanta oo kudhexaala xarunta maaliyada. Qarashka lagu baxsho qaababkaan waxaa lamarsiin karaa xadidaado, ayna kujiraan, laakiin aan kukoobnayn, inta jeer ee koonto lacag lagu shubi karo ama lacag laga qaadi karo waqti gaar ah; cadadka lacageed ee laguugu shubi karo ama lagaaga jaran karo koonto; ama xanibaadaha kale ee aan soo rognno ama ay soo rogaan baanka ay kutaalo koontadu.